IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

# جريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 17aad Muqdisho 15ka Feberaayo 1989 L. 1 R 2

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMAHA: waa 5 shilin lambar walba — RUKUNKA: Sannadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadeedana waa Shs. 500. Rukunka Taweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii saddar iyo wixii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

KOOB NIIN

## QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

| | | |
|---|---|---|
| SHARCI L. 2 ee 26 Jan. 1989, Sharciga Mihnadda gaarka ah ee Takhaatiirta, iyo Xannaanada Xoolaha. | Bog; | 60 |
| SHARCI L. 3 ee 26 1989, Fasaxid soo dejinta iyo ka ganacsiga daawada iyo qalabka X/ha. | » | 65 |
| SHARCI L. 4 ee 26 Jan. 1989, Ganacsiga Hargaha iyo Saamaha | » | 67 |
| SHARCI L. 5 ee 26 Jan. 1989, Sharciga Badda Soomaaliyeed. | » | 68 |
| SHARCI L. 6 ee 26 Jan. 1989, Fasaxid adeegyada gaar ahaaneed ee Gaadiidka Badda. | » | 69 |
| SHARCI L. 7 ee 26 Jan. 1989, Oggolaansho Bankiyo gaar ahaaneed. | » | 70 |

Wakaaladda Madbacadda Qarankà

SHARCI L. 8 ee 26 Jan. 1989, Fasaxid Furitaan Caymis gaar ahaaneed (Private Insurance) » 71

SHARCI L. 9 ee 26 Jan. 1989, Soo dejinta daawada dadka iyo qalabka C/dka. » 72

SHARCI L. 10 ee 26 Jan. 1989, Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha. » 73

QAYBTA LABAAD

XXXX

W. M.

QAYBTA LABAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 27.1.89, Lumid 2 J/War. ku qoran Xakiimo Xuseen Caddan L. 29. » 74

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 27.1.89, Lumid J/War. L. 0761612 ku qoran Xaawo Jaamac Xirsi L. 30 » 75

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.1.89 Lumid Buug Kayd L. 18747 ku qoran Asli Axmed Khayre L. 31 » 76

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.2.89 Lumid J g W. L. D37955 ku qoran Xasan X. Xuseen L. 32 » 77

MAXKAMADDA G. NUGAAL 18.1.89 Lumid Jeeg War. L. 1185376 ku qoran Muumino Saciid Cali L. 33 » 78

MAXKAMADDA G. BANAADIR 14.12.88 Lumid Jeeg War. L. 0761803 ku qoran Cabdulqaadir Muues Caraale L. 34 » 79

MAXKAMADDA G. BANAADIR 17.12.88 Lumid 2 Jeeg ku qoran Aamina Cusmaan Faarax L. 35 » 80

MAXKAMADDA G. BAY, 29.1.89 Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Cali Macallin Maxamed L. 36 » 81

3

## QAYBTA KOWAAD

## S H A R C I

Sharci Lambar 2 Tr. 26 Jan. 1989 Sharciga Mihnadda Gaarka ah ee Takhaatiirka Caafimaadka & Xan/da Xolaha.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

### Qodobka 1aad

**Fasixidda Furitaanka Mihnadda Takhaatiirta Xoolaha**

Waxaa La fasaxay furitaanka Mihnadda gaarka ah ee Takhaatiirta Caafimaadka iyo Xannaanada Xoolaha iyo ka talo bixinta dhaqmada habboon ee Xoolaha (Consultance).

### Qodobka 2aad

Ujeeddada Fasaxidda Furitaanka

Ujeeddada Furitaanka Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimadu waxay tahay in lagu baahiyo Xoolo dhaqatada Soomaaliyeed daaweynta iyo Xannaanada Xoolaha.

### Qodobka 3aad

Dadka Loo Oggol Yahay Mihnadda

Mihnadda Gaarka ah ee Takhtarnimada Xoolaha waxaa ku shaqaysan kara Takhaatiirta Dawladda, waqtiyada kA baxsan saacadaha shaqada iyo kuwa iskood u madax banaan ee oofiya shuruudaha ku tilmaaman qodobada soo socda:

### Qodobka 4aad

### SHURUUDO

Qofka Mihnadda Gaarka ah ee Takhtarnimada ku shaqaynaya waa in uu buuxiyaa shuruudaha hoos ku taxan:

b) Waa in uu Soomaali yahay.

t) Waa in uu haystaa Shahaado Jaamacadeed (Laurea) ee daaweynta ama Xannaanada Xoolaha oo Dalka Laga aqoonsan yahay.

j) Waa in uu leeyahay khibrad Takhtarnimo oo aan ka yareen 5 sano oo uu ku kasbaday Dalka gudihisa ama dibeddiisa

Qodobka 5aad

Takhtarka Xoolaha iyo Xannaaneyntooda ee buuxiya shuruudaha sharcigan ku tilmaaman (qodobka hore) ee raba In uu ku shaqeeyo Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada, wuxuu Wasiirka Xannaanada Xoolaha u qoranayaa codsi. Codsiga waa in lagu soo lifaaqaa.

I) Laba Sawir.
II) Nuqulka Shahaaddada Jaamacadda iyo haddii uu Leeyahay Shahaado/Diploma Takhasus.
III) Qoraal gaar ah oo tilmaamaya goobta iyo rugta Shaqo iyo tas.hiilaadka yaala.

Qodobka 6aad

OGGOLAANSHO

1. Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo daaqa, ka dib markuu dhegeysto talada Guddiga Diiwaan-gelinta Takhaatiirta ee Wasaaradda, ayna u sugnaato in codsadaha ay u dhammeystiran yihiin shuruudaha sharcigani tilmaamayo, wuxuu u oggolaanayaa Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada Caafimaadka iyo Xannaanada Xoolaha.

2. Wasiirku wuxuu codsiga ku diidi karaa go'aan sababeysan, ka dib markuu dhegeysto talada Guddiga Diiwaan-gelinta, waxaana go'aanka la gaarsiinayaa codsadaha muddo 15 maalmood gudahood, laga bilaabo taariikhda go'aanka.

Qodobka 7aad

RUQSADDA GOOB SHAQO «SHATI»

1. Mihnadda Gaarka ah ee Takhtarnimada iyo Caafimaadka Xoolaha waxaa loo qaadanayaa ruqsad goob shaqo (Shati).

2. Dawladda Hoose waxay Takhtarka ruqsad u siineysaa:
b) In uu furto rugta sare u qaadidda tayada iyo teknolojiyada Xoolaha iyo digaagga (attivita, sootecniche).
t) In uu furto rug cafimaad ama bukaan socod (vet. clinic)
3. Dawladda Hoose waxay ruqsadda goob shaqo siin kartaa Takhtarkii haysta fasaxa Wasiirka ee ku tilmaaman qod

Qodobka 8aad

QAABKA RUGTA

1. Rugta Lagu fulinaayo shaqada Takhtarnimada waa In ay noqotaa mid xagga farsamada, dhismaha iyo degaan-kaba u qalanta Mihnadda.

2. Rugtu waa in ay ugu yaraan qol baaris, qol maqaa-siin daawo, musqul. waana in uu lahaadaa deyr wareegsan.

Qodobka 9aad

DAAWOOYINKA & QALABKA SHAQO EE GAARKA AH

Takhtarka Caafimaadka Xoolaha ama Takhtarka Xan-naanada Xoolaha wuxuu dibedda ka dirsan karaa daawoo-yin gaar ah qalab ama bivological chemicals ee baahidiisa shaqo oo aan heer ganacsi geli karin. waana in looga helaa ruqsad Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Qodobka 10aad

Cinwaanka goob shaqo iyo Diiwaangelinta Xoolaha.

1. Takhtarku wuxuu warbixinnadiisa. codsiyada iyo tilmaamaha daawada (ricetta medica) iyo wixii kale ee sha-qada la xiriira u sameynayaa warqado gaar ah oo ku daaba-can magaciisa iyo cinwaanka goobta shaqo.

2 Wuxuu kaloo sameynayaa diiwaan lagu qoro xoola-ha bukaan socodka ah ee lagu eego rugtiisa.

Qodobka 11aad

Khidmadda Takhtarka

Khidmadda Takhtarku ku fulinayo hawlihiisa waxaa Lagu soo saarayaa Xeer Wasiir.

Qodobka 12aad

Fasax ka Qaadid

1. Fasaxa Wasaaradda ee Mihnadda gaarka ah ee Ta-khtarnimada waxaa laga qaadayaa Takhtarkii.

b) Ka soo bixi waaya shuruudaha bixinta ruqsadda Mihnadda.

t) uu ku dhaco xukun maxkamadeed oo reebaya xil Guud oo xirfadda la xiriirta.

j) ku xad gudub anshaxa Takhtarnimada (vet. ethics)

2. Fasax ka qaadidda waxaa lagu guddoominayaa go'aan sababeysan oo Wasiirku soo saaro, isagoo dhegeystay talada Guddiga.

Qodobka 13aad
Diiwaanka Mihnadda

1. Waxaa jiraya diiwaan lagu magacaabo diiwaanka Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada.

2. Diiwaanka waxaa lagu qorayaa magaca takhtarka oo buuxa, shahaadooyinkiisa, taariikhda fasaxa la siiyey, goo bta iyo hadba isbeddelka ku dhaca iyo wixii kale oo tilmaamo ah, Mihnaddana khuseyn kara.

Qodobka 14aad
Guddiga Diiwaan-gelinta iyo Kormeerka.

1. Wasaaradda waxaa laga dhisayaa guddiga diiwaangelinta iyo Kormeerka, Wasiirka ayaana magacaabaya sannadkiiba hal mar waxaana laga dhex xulayaa takhaatiirta waayo aragnimada leh ee Dalka.

2. Guddigu wuxuu talo ka bixinayaa.

b) codsiyada Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada.

t) Anshax-marinta Takhaatiirta ku shaqeeya Mihnada

3. Guddigu wuxuu awood u leeyahay in uu talo toos ah ka soo jeediyo goobta shaqo ama Takhtarka uu u arko inuu san buuxineynin shuruudaha sharcigan ku tilmaaman, una gudbiyo Wasiirka si looga qaado tallaabada ku habboon.

4. Guddigu wuxuu yeelan doonaa xoghayn.

Qodobka 15aad
ANSHAX-MARINTA

1. Awoodda Anshax-marinta waxaa leh Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta & Daaqa wuxuuna guddoominayaa marka uu dhegeysto talada Guddiga Diiwaan-gelinta & Kormeerka ee Wasaaradda.

2. Takhtarkii ku xad gudba tilmaamaha sharciga lagu jideeyey, haddii uusan falkiisu keeneynin dembi ciqaab ah ama ka joojin Mihnadda Takhtarnimada ee gaarka ah waxaa Lagu ganaaxayaa sh.so. 10.000 ilaa sh.so. 15.000 Haddiise Ta khtarku isla dembigaas uu mar kale ku laabto, waxaa laga joojinayaa Mihnadda gaarka ah muddo aan ka yareen 6 bil-ood ilaa hal sano.

3. Lacagta ganaaxa ah waxaa lagu shubayaa khasnad-da dhexe ee Dawladda.

Qodobka 16aad
XEER WASIIR

Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa waxaa awood loo siiyey in uu Xeer Wasiir ku soo saa-ro tilmaamo dhammeystiraya ama habeynaya Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada Caafimaadka iyo Xannaanada Xoolaha, isagoo dhowraya sharcigan iyo shuruucda kale ee saameeya Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada.

Qodobka 17aad
BURIN SHARCI

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qodobka 18aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa Isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Jan. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre.

Sharci lambar 3, taariikh 26 Jan. 1989: Fasaxid soo dejinta iyo ka ganacsiga daawada iyo qalabka xoolaha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Fasaxidda ka ganacsiga daawada iyo qalabka xoolaha

Waxaa ganacsatada gaar ahaaneed loo fasaxay soo de_jinta iyo ka ganacsiga daawada iyo qalabka xoolaha.

Qod. 2aad

Hay'adaha Dawladda

Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa iyadu waxay si sinnaan ah ula tartami kartaa Ganacsatada gaar ahaaneed.

Qod. 3aad

Ujeeddada fasaxidda

Ujeeddada fasaxidda soo dejinta iyo ka ganacsiga daa_wada iyo qalabka xoolaha waxaa loogu daneynayaa xoolo dhaqatada Soomaaliyeed iyadoo lagu baahinaayo daawada iyo qalabka xoolaha Gobollada Dalka oo idil.

Qod. 4aad

Shuruudaha fasaxidda

Qofka loo fasaxay soo dejinta iyo ka ganacsiga daawada iyo qalabka xoolaha waa in uu buuxiyaa shuruudaha hoos ku qoran:

a) Waa inuu haystaa shatiga keenidda iyo dhoofinta (Import_export license).

b) Waa in uu leeyahay meel ku habboon dhigashada daawada;

t) Waa in uu ganacsaduhu ka keenaa daawooyinkaas xoolaha Shirkad ama Hay'ado muctarif ah oo ka dii_

waan gashan Dawladahooda.

Qod. 5aad

Guddiga diiwaangelinta iyo kormeerka

Waxaa la abuuray Guddiga Diiwaangelinta iyo Kormeerka oo ka tirsan Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Qod. 6aad

Shuruudaha Diiwaangelinta

1. Qof kasta oo doonaya in uu soo dejiyo kana ganacsado daawada iyo qalabka xoolaha waa in laga diiwaan geliyaa Guddiga Diiwaangelinta iyo Kormeerka Ganacsiga Daawada iyo Qalabka Xoolana ee Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, waana inuu haystaa ruqsad guud ee ganacsi (shati).

2. Diiwaangelinta qofka ganacsadaha ah wuxuu bixinayaa lacag dhan 10.000/= (tobankun) Shilin Soomaali oo ah kharajka diiwaangelinta (REGISTRATION FEE).

Qod. 7aad

Xeer Wasiir

1. Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa waxaa awood loo siiyey in uu Xeer Wasiir ku soo saaro tilmaamo dhammeystiraya ama habeynaya ka ganacsiga daawada iyo qalabka xoolaha, liiska daawada xayiran, Xubnaha Guddiga diiwaangelinta iyo Kormeerka, isagoo dhawraya Sharciga iyo Shuruucda kale ee la xidhiidha Daawada iyo Qalabka Xoolaha.

2. Xeerka Wasiirka waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qod 8aad

Burin

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 9aad

Dhaqangal

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Jan. 1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 4, taariikh 26 Jan. 1989: Ganacsiga Hargaha iyo Saamaha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la fasaxay in uu qof kastaba ka ganacsan karo, Dalka gudihiisa iyo dibeddiisaba, hargaha iyo Saamaha.

Qod. 2aad

Hay'adaha Dawladdu waxay si sinnaan ah ula tartamayaan Ganacsatada gaar ahaaneed.

Qod. 3aad

Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha waxaa awood loo siiyey in uu Xeer Wasiir ku soo saaro tilmaamo dhammeystiraya ama habeynaya ka ganacsiga hargaha iyo saamaha.

Qod. 4aad

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 5aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadd Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Jan. 1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 5, taariikh 26 Jan. 1989: Sharciga Badda Soo-
maaliyeed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday Sharciga Badda Soomaaliyeed ee halkan ku lifaaqan.

Qod. 2aad

Waxaa la buriyey Sharciga Badda lambarkiisu yahay 1 ee 21 Febraayo 1959 iyo Sharci kasta ama Xeer-nidaamiye kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa lixdan maalmood kad dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 26 Jan. 1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 6, taariikh 26 Jan. 1989: Fasaxid adeegyada gaar ahaaneed ee Gaadiidka Badda;

MADAXWEYNAHA JDS

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la fasaxay in uu qof kasta ka ganacsan karo Adeegyada Gaadiidka Badda iyo Hawlaha Maraakiibta.

Qod. 2aad

Hay'adaha Dawladdu waxay si sinnaan leh ula tartamayaan Ganacsatada gaar ahaaneed ee ku hawlan adeegyada gaadiidka Badda iyo hawlaha maraakiibta.

Qod. 3aad

1. Shuruudaha fasaxidda, awoodda kormeer iyo jiheyn ee Hay'adaha Dawladda ee Hawlaha Adeegyada Gaadiidka Badda iyo Maraakiibta waxaa lagu qeexi doonaa Xeer uu soo saaro Wasiirka Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda.

2. Xeerka Wasiirka waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qod. 4aad

1. Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda waxay ku yeelanevsaa Adeegyada gaar ahaaneed ee Gaadiidka Badda iyo Hawlaha Maraakiibta awood hubineed, kormeer iyo jiheyn oo lagu qeexi doono Xeer uu soo saaro Wasiirka Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda.

2. Xeerka Wasiirka waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qod. 5àad

Waxaa la buriyey Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 6aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Jan. 1989

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 7 Tr. 26 Jan. 1989 Oggolaasho Bankiyo Gaar Ahaameed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga
WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa Laga furi karaa Bankiyo gaar ahaaneed (Private Banka).

Qodobka 2aad.

Furitaanka Bankiyada ku tilmaaman qodobka hore waxaa Oggolaanaya Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta, isagoo dhege ystay talada Guddoomiyaha Bankiga Dhexe.

Qodobka 3aad

Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed wuxuu ku yeelanayaa Bankiyada kor ku xusan awood baariseed, kormeer iyo iiheyn ee ku tilmaaman Xeer sharci lambar 6 ee 19 oktoobar 1968 oo Loo ragay sharci lambar 27 ee 26.11.1968 iyo beddelaaddii ka danbeysay.

Qodobka 4aad

Waxaa la buriyay sharci kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 5aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho. 26 Jan. 1989.

MADAXWEYNAHA J D S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 8 Tr. 26 Jan. 1989 Fasaxid Furitaan Ceymis gaar ahaaneed (Private Insurance).

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Dalka J.D.S. Waxaa laga furi karaa. kana hawl geli kara Ceymisyo gaar ahaaneed (Pricate Inusrance).

Qodobka 2aad.

Furitaanka Ceymisyada ku tilmaaman qodobka hore waxaa fasixi kara Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta.

Qodobka 3aad

Hay'adaha Dawladdu waxay si sinnaan leh ula tartamayaan Ceymisyada gaar ahaaneed.

Qodobka 4aad

1. Shuruudaha fasixidda, awoodda kormeer iyo iiheyn ee Dawladda ee Ceymisyada gaar ahaaneed waxaa loogu qeexi doonaa Xeer uu soo saaro Wasiirka Maaliyadda & Lacagtu.

2. Xeer Wasiirka waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qodobka 5aad

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 6aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Jan. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 9 Tr. 26 Jan. 1989 Soo dejinta Daawada Dadka iyo qalabka Caafimaadka.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Sharciga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la fasaxay soo dejinta daawada dadka iyo qalabka Caafimaadka.

Qodobka 2aad.

Hay'adaha Dawladdu waxay si sinnaan leh u la tartama-yaan ganacsatada gaar ahaaneed.

Qodobka 3aad

Qofka loo fasaxay soo dejinta daawada dadka iyo qalab-ka Caafimaadka waa in uu iska diiwaan geliyaa Wasaaradda Caafimaadka.

Qodobka 4aad

Waxaa la abuuray guddi diiwaan-gelin oo ka tirsan Wa-saaradda Caafimaadka, xubnihiisuna ku soo bixi doonaan Xeer Hoosaad uu soo saaro Wasiirka Caafimaadka.

Qodobka 5aad

Shuruudaha diiwaangelinta, kormeerka iyo baarista kee nidda daawada dadka iyo qalabka caafimaadka waxaa lagu tifaftiri doonaa xeer hoosaad uu soo saaro W/Caafimaadku.

Qodobka 6aad

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo hor jeedo ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 7aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Jan. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Sharci Lambar 10 Tr. 26 Jan. 19 9 Ganacsiga Faleenka iyo Xabkaha.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashana Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la fasaxay in uu qof kastaba ka ganacsan karo Dalka gudihiisa iyo dibadiisaba, faleenka iyo Xabkaha.

Qodobka 2aad.

Hay'adaha Dawladdu waxay si sinnaan ah ula tartamayaan ganacsatada gaar ahaaniee.

Qodobka 3aad

Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha waxaa awood loo siiyey in uu Xeer Wasiir ku soo saaro tilmaamo dhammeystiran ama habeynaya ka ganacsiga faleenka iyo xabkAhA

Qodobka 4aad

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 5aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Jan. 1989.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Xakiimo Xuseen Cadaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. Lam. 0265175-0764817 laga sameeyey Laamaha Saad iyo Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 145.000 iyo Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Xakiimo Xuseen Cadaan sida ku cad warqadda lam. 0786 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0265175-0764817 kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh. So. 195.000 kuna qoran magaca Jakiimo Xuseen Cadaan lagana sameeyey Laamaha Saad iyo Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Xakiimo Xuseen Cadaan lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 195.000 ii ah bedelkii Jeegagga War. oo kor ku xusan markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 29

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Xaawo Jaamac Xirsi.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0761612 Laga sameeyay Jaanta laad ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed kuna jirto Lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca Xasan Maxamuud ku cad warqadda Lr. 0791 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta laad.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0761612 ku na jirto Lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca Xasan Maxamuud Hayi lagana sameeyay L/laad ee Bankiga Ganac siga iyo keydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

L/laad ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed In ay siiso J/le Xaawo Jaamac Xirsi Lacagta Cadadkeedu ta hay sh.so. 50.000 oo ah beddelkii J/War. oo kor ku xusan ma rkii ay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood Laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Ra- smiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.1.89.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 30

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Dr. Muuse Axmed Muuse;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd lam. 18747 oo laga sameeyey Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 386.873,84 kuna qoran magaca Asli Axmed Khayre sida ku cad warqadda lam. 0042 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lr. 18747 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 386,873,84 kuna qoran magaca Asli Axmed Khayre lagana sameeyey Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Dr. Muuse Axmed Muuse lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 386,873,84 oo ah bedelkii Buugga Kaydka oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii intaa ka hor aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 31

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulqaadir Muuse Caraale;

HADDUU TIXGELIYEY: in uu lumay Jeeg War. Lam. 0761803 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 28.500 ku qoran magaca J.le Cabdulqaadir Muuse Caraale si- Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar:

da ku cad warqadda lam. 14945 ee Bangiga Ganacsiga iyo

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0761803 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 28.500 ku qoran magaca J.le Cabdulqaadir Muuse Caraale.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar in ay siiso J.le Cabdulqaadir Muuse Caraale lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 28.500 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 34

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Xasan X. Xuseen Macalin;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. D 37955 laga sameeyey Laanta Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 400.000 kuna qoran magaca Xasan X. Xuseen sida ku cad warqadda Lam. ——— ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. D. 37955 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 400.000 kuna qoran magaca Xasan X. Xuseen Macalin lagana sameeyey Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xasan X. Xuseen Macalin lacagta cadadeedu tahay Sh. So. 400.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.2.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 32

## MAXKAMADDA GOBOLKA NUGAAL
## QAYBTA MADANIGA EE GAROOWE

Tr. 18.1.89

MGN.G./7/89

MGN.G./10/89

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Nugaal markuu arkay; Tixraac Taar lambar aan lahayn taariikh, 1.9.88 iyo tixraac Taar taariikh. 11.1.89 ee ka soo baxay Laanta Bangiga Ganacsiga Laanta Garoowe ujeedadoodana tahay Jeeg lumay, lambarkiisu yahay 1185376 ayna ku qoran tahay lacag dhan Sh. So 100.000 kuna qoran magaca Muumino Saciid Cali Garsooraha Maxkamadda Gobolka Nugaal Haddii Arkay Qod. 69 ee Sharciga 2aad Tr. 9.9.1962:

HADDUU ARKAY: Xaqiijinta Jeegga lumay ayna xaqiijiyeen Bangiga Ganacsiga Laanta Garoowe;

Garsooraha Maxkamadda Gobolka Nugaal wuxuu soosaaray Amarkaan:

1. In Jeegga lumay lagu qoro Faafinta Rasmiga ah;

2. Inuu bixiyo Bangigu lacagtii ku qorayd Jeegga lumay; Lr 1185376 ayna ku qoran tahay lacag dhan Sh.So 100 000 in Jeeggaas la baabi'iyo ama la tirtiro lacagtii ku qoranaydna Bangigu bixiyo Haddii aan Jeeggaas la qaadan ama la isticmaalin ama aysan imaan wayyaalo kale oo hor istaag ah, laguna bixiyo muddo aan ka yarayn 15 casho ka dib markii lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah; haddii inta ka horreysa la helo Jeeggaas wax ishortaag ah ma jiraan: waxaana la noqon karayaa amarkaan; ah in Jeegga la tirtiro.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Nugaal Garoowe
(Sh. Cabdullaahi Macalin Daahir)

L. 33

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
## QAYBTA MADANIGA
## GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Aamina Cusmaan Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. Lam. 0793130 iyo Jeeg War Lam. 079331, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 80.000 kuna qoran magaca Aamina Cusmaan Faarax sida ku cad warqadda lam. 14943 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega oo lam. 0793130 iyo J.W. Lam. 079331 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 80.000 kuna qoran magaca J.le Aamina Cusmaan Faarax, ayna ku kala qoran yihiin Jeeg walba lacagta dhan J.W. Lam. 0793130 ku qoran lacagta dhan Sh. So. 50.000 J.W.Lam. 079331 ku qoran lacagta dhan Sh. So. 30.000.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso lacagta cadaadkeedu yahay Sh.So. 80.000 oo an bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan, markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii aan inta ka horreysa aan wax is hortaag ah ka imaanin la keenin.

Muqdisho, 17.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 35

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY BAYDHABO

L.M.G.B./20/89 BAYDHABO, Tr. 29.1.89

UJEEDDO BAAFIN JEEGAGGA WAREEGA OO LAMBARRA-DOODA KALA YIHIIN:-

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BAY

MARKUU ARKAY: Arjiga codsiga ee uu soo qortay J.le Xasan Maxamed Sheekh Ibraahim ee Tr. 28.1.89 kuna saabsanaa Baafinta Jeegagga Wareega ee ay Lambarradooda hoos ku qoran yihiin;

MARKUU ARKAY: Ogeysiiska Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baydhabo;

MARKUU ARKAY: Qodobka 69 D.L. 9.9.65 N. 2, ee Lumidda Jeegagga Wareega ee Lambarradooda kala yihiin:- 1) J.W.L. 027264, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 500.000 (shan boqol oo kun), 2) J.W.L. 0272605, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 500.000 (shan boqol oo kun), 3) J.W.L. 717327, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 18.500 (toban kun iyo shan boqol oo shilin oo ku wada qoran magaca J.le Cali Macalim Maxamed lagana wada sameeyey Laanta Wardhiigley oo ay taariikhdooduna wada tahay 14.1.89 isu geynta guud ee lacagaha ku qoran Jeegagga Waa 1.018.500 (Hal malyan iyo toban iyo siddeed kun iyo shan boqol. Sidaa Awgeed.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegaggaas ka dib markii ay ka soo wareegto mudada 30 maalmood, oo ka bilaabata maalinta Dekereetada lagu shaaciyo ama Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, isla markaana in Jeegagga cusub oo la sameyn doono gacanta laga saaro codsadaha sare ku xusan ama qof asaga ka sita Wakaalad Sharci ah, ayadoo la sugayo mudada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

GUDDOOMIYAHA M.G.BAY
(Aadan Wardheere Cali)

L. 36